



UJEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **09/03/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXISO:- SHUKRI FARAH NUR, Hooyo: Timiro Diriye Tarey, Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 01/10/1993, Sidata: Somali Passport, Lr. P01022197, Kana soo baxay waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Soomaliya

LA WAKIISHE:- NASRO OMAR ADE , Hooyo: Xaliimo Ciise Maxamuud , Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 10/01/1980, Degan Howlwadaag, Sidata: Somali Passport, Lr. P01621264, Kana soo baxay waxda Socdal Jinsiyadaha Somaliya

B- Aniga oo ah **SHUKRI FARAH NUR**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **NASRO OMAR ADE** una wakiishay dhamaan qeybta dhaxalka ah ee aan ku leeyahay Seygeyga Marxuum **Cabdiqaadir Cumar Cade**, oo isaguna sii dhaxlaya Hooyadiisa Marxuumad **Xaliima Ciise Maxamuud** oo iyaduna sii dhaxlaysa dhamaan Wax Alaale Wixii Hanti ah uu Lahaa kana geeriyooday Aabaheeda Marxuum **Ciise Maxamuud saalax Samatar** kuna Qoran Magaciisa Mood & Noolba leh, kuna taala Gobolka Banaadir & Gobolada kale ee dalka, sida guri, dhul banaan, goof, beer, Gaadiid, sheer shirkadeed, I.W.M, in Qaybtayda ay gadi karto, Wareejin Karto, Hibeyn karto, dhisi karto, ijaari karto, u dacwoon karto, qareen u qaban karto, uguna doodi karto Maxkamadaha dalka hortooda, iina sameen karto waraaqaha dhaxalkoobka ah, isla markaasna ii saxiixi karto kaalinteyda ku aadan dhamaan waraaqaha la iiga baahdo suul iyo saxiixba sida waraaqaha dhaxalkoobka ah, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **NASRO OMAR ADE** awoodaas aan siiyay ay u madax banaan tahay oo aniga Qeyb dhaxaleedkaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **NASRO OMAR ADE**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiisay SHUKRI FARAH NUR, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA

SHUKRI FARAH NUR

Shukri

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

NASRO OMAR ADE

Nasro

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- MOHAMUD ADEN MOHAMED

2- AHMED MOALIM MUSE NUR

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1441/T.P.N/25, Tr. 09/03/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **SHUKRI FARAH NUR** Ahna (Wakaalad Bixiso), 2- **NASRO OMAR ADE** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 14/04/2025

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Maxamuud Aadan Maxamed** oo ka Wakiil ah La Wakiishe **Nasro Cumar Cadde** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 1441/T.P.N/25, Tr. 09/03/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Nasro Cumar Cadde
Nooca	Wakaalad Guud
Loo Wakiishay	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixisada Shukri Faarax Nuur
Taariikhda Wakaalada	09/03/2025

Wakiilka La Wakiishe: Aniga oo ah **Maxamuud Aadan Maxamed**, Leh Tel No. **0615447682**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay ayna leedahay **Nasro Cumar Cadde**.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Maxamuud Aadan Maxamed